وحدة الوطن سبيل قوته
Midnimada dalka waa jidka awooddiisa

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا)

(**Xarigga Alle qabsada dhammaantiina hana kala tagina**).

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Intaas kaddib:

Wuxuu la yimid nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - risaalo ugu yeeraysa midnimada iyo isku duubnaanta oona reebaysa kalatagga iyo khilaafka, wuxuu isu keenay carab oo kala daadsan wuxuuna ka dhigay hal ummad wuxuu ku walaalaysiiyay walaaltinnimada iimaanka, qalbigoodana wuxuu isugu geeyay isjacayl, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ}

(**Mu'miniinta waa uun walaalo**), wuxuu yiri Alle subxaanahu:

{وَأَلَّفَ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ لَوْ أَنْفَقْتَ مَا فِي الأَرْضِ جَمِيعًا مَا أَلَّفْتَ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ وَلَكِنَّ اللَّهَ أَلَّفَ بَيْنَهُمْ إِنَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ}

(Isuna soo keenay quluubtooda, haddaad bixiso waxa dhulka ku sugan oo dhan maadan isu keenteen quluubtooda, laakin Alle ayaa isu keenay dhexdooda Illeen isagaa Adkaade falsan ehe).

Sidoo kale wuxuu amray nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - in lays jeclaado laysuna naxariisto wuxuu yiri:

(مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ ، إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى)

(**Mu’miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa**).

Isjacaylkaanna kuma ekaanin muslimiinta dhexdooda dadkoo dhan ayaa soo galaya, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَى وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ}

(**Dadow waxaan idinka abuurnay lab iyo dhaddig, waxaanna idinka yeelnay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Allana wax walba waa ogyahay**).

Sidanna waa sida quraanka kariimka adkeeyay markuu ka hadlay walalaaltinnimada insaaniyadda ka dhexaysay anbiyada iyo dadka ku khilaafay caqiidada, waxaa ka mid ah taas oraahda Alle:

{وَإِلَى عَادٍ أَخَاهُمْ هُودًا}،

(Waxaan u dirnay caad walaalkooda Huud), iyo oraahdiisa:

{وَإِلَى ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا}

(**Waxaan u dirnay Thamuud walaalkooda Saalix**)

Iyo oraahda Alle subxaanahu:

{وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا}

(**Waxaan u dirnay Madyan walaalkooda Shucayb**)

Alle markuu sheegay kaddib qisooyinka anbiyada hore wuxuu yiri:

{وَإِنَّ هَذِهِ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَأَنَا رَبُّكُمْ فَاتَّقُونِ}

(**Tanna waa umaddiinii umad kaliya anna waxaan ahay rabbigiina ee iga dhawrsada**)

Wuxuu yiri subxaanahu:

{إِنَّ هَذِهِ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَأَنَا رَبُّكُمْ فَاعْبُدُونِ}

(**Tanna waa umaddiinii umad kaliya anna waxaan ahay rabbigiina ee i caabuda**).

Wuxuu yiri Imaam Albaqawi - Alle ha u naxariistee -: Ilaahay anbiyada dhan wuxuu usoo diray oogidda diinta iyo isukeenka dadka iyo ka tagidda khilaafka iyo kalatagga.

Waxaan shaki ku jirin inay ka mid tahay docwada Islaamka uu ugu yeerayo midnimada iyo kulmidda iyo tuuridda kalatagga iyo nafjeclaysiga mid ka mid ah waxyaalaha lagu ilaaliyo awoodda dalka iyo nabadda bulshada maxaayeelay qofka si kaste hadduu xoog u leeyahay oo uu ku jiro bulsho daciif ah wuxuu ahaanayaa daciif, waxaa kasoo horjeeda qofka hadduu daciif yahay oo uu ku sugan yahay bulsho xoog leh wuxuu awood ka helayaa bulshada oo uu ku nool yahay sidaa awgeed Islaamka wuxuu kor u qaaday qiimaha wadaninimada wuxuu sugay dalka inuu u sugan yahay dadkiisa oo dhan dhammaantoodana ayaa iska leh, maxaayeelay midnimada dalka waxay keenaysaa inaan lagukala geynin dadkiisa diin iy midab iyo jinsi carabi kama sarreeyo cajami caddaanna kama sarreeyo madow taqwo mooyee iyo camal suuban halkan ayuu ka yimid heshiiska Madiina uu nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - la galay yahuudda Madiina , wuxuu siiyay yahuudda dhammaan xuquuqda muslimiinta xagga xoriyada iyo amaanka iyo nabadda, wuxuuna korka ka saaray inay la wadaagaan muslimiinta difaaca Madiina taasoo sugid adag in dalka xaga Islaamka uu yahay mid dhammaan muwaadiniinta ay soo galayaan uuna wada

deeqayo mid kastena mas'uuliyad iyo waajibaad ay ka saaran yihiin.

Sidoo kale Islaamka wuxuu kor u qaaday qiimaha wada shaqeynta wuxuuna ka dhigay mideynta safka iyo iskaashiga iyo xooridda khilaafaadka waajib ku ah umadda meel kaste iyo waqti kaste waa amarka Ilaahay oo ku sugan quraanka kariimka, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا}

(**Xarigga Alle qabsada dhammaantiina hana kala tagina**), wuxuu leeyahay rasuulka:

(إِنَّ اللهَ يَرْضَى لَكُمْ ثَلَاثًا ، وَيَكْرَهُ لَكُمْ ثَلَاثًا ؛ فَيَرْضَى لَكُمْ: أَنْ تَعْبُدُوهُ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا ، وَأَنْ تَعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا ، وَيَكْرَهُ لَكُمْ : قِيلَ وَقَالَ ، وَكَثْرَةَ السُّؤَالِ ، وَإِضَاعَةَ الْمَالِ)

(**Alle seddex ayuu raalli idin kaga yahay seddexna wuu idinku kiraahsadaa, wuxuu raalli idin kaga yahay inaad caabuddaan oo ayadan wax la wadaajinin, inaad qabsataan xarigga Alle dhammaantiina oo aydan kala tagin, wuxuu idinku kiraahsadaa; waa la yiri iyo wuu yiri, iyo su'aal badan, iyo dayacidda maalka**).

Wuxuu nabiga ummadda tusaale uga dhigay markay midwodo oo ay is qabsato dhis isku rasaysan, wuxuu yiri rasuulka:

(الْمُؤْمِنُ لِلْمُؤْمِنِ كَالْبُنْيَانِ ؛ يَشُدُّ بَعْضُهُ بَعْضًا ، وَشَبَّكَ بَيْنَ أَصَابِعِهِ)

(**Mu'minka wuxuu u yahay mu'minka dhis oo kale qaarkii qaarka kale ayuu adkeeyaa, farahiisa ayuu is dhexgaliyay**).

Quraanka kariimka wuxuu noogu sameeyay tusaalooyin midnimada oo keentay ilaalinta wadanka iyo nabadda bulshada, waxaa ka mid ah wixii ka sugnaaday sayidinaa Yuusuf - nabadgelyo korkiisa ha haatee - markuu diyaaryay qorshaha suganaa dhammaan ay isku kaashadeen oo ay gadaashiisa istaageen oo ayna ku dabbaqeen waaqaca, way iskaashadeen mid kaste intuu awoodo si waafaqsan qorshaha u degsan iyo raadinta ujeeddada la doonayo dalka wuxuu helay bashbash iyo barwaaqo iyo ilaalo iyo awood dhaqaaleed dadka ayaa uga yimid meel kaste si ay u helaan khayrka Masar wuxuu leeyahay Alle asoo kasoo guurinaya sayidnaa Yuusuf:

{قَالَ تَزْرَعُونَ سَبْعَ سِنِينَ دَأَبًا فَمَا حَصَدتُّمْ فَذَرُوهُ فِي سُنبُلِهِ إِلَّا قَلِيلًا مِّمَّا تَأْكُلُونَ * ثُمَّ يَأْتِي مِن بَعْدِ ذَلِكَ سَبْعٌ شِدَادٌ يَأْكُلْنَ مَا قَدَّمْتُمْ لَهُنَّ إِلَّا قَلِيلًا مِّمَّا تُحْصِنُونَ * ثُمَّ يَأْتِي مِن بَعْدِ ذَلِكَ عَامٌ فِيهِ يُغَاثُ النَّاسُ وَفِيهِ يَعْصِرُونَ}

(**Waxuuna yiri waxaad tacbanaysaan todoba sano oo israacsan ee waxaad goosataan ku daaya sabuulkiisa wax yarood cunaysaan mooyee * markaas waxaa imaan arrintaas ka dib todobo daran oo cuni waxaad hor marsateen wax yar ood kaydsateen mooyee * markaas kadib waxaa imaan sano loo gargaaro dadka oo dhexdeeda ay wax miiran**).

Sidoo kale Islaamka wuxuu ugu yeeray wax kaste sabab u noqon kara midnimada, wuxuu ugu yeeray naxariista iyo jilicsanaanta iyo degenaanta, wuxuu yiri Alle:

{فَبِمَا رَحْمَةٍ مِنَ اللَّهِ لِنْتَ لَهُمْ وَلَوْ كُنْتَ فَظًّا غَلِيظَ الْقَلْبِ لَانْفَضُّوا مِنْ حَوْلِكَ فَاعْفُ عَنْهُمْ وَاسْتَغْفِرْ لَهُمْ وَشَاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَوَكِّلِينَ}

(**Naxariista Alle darteed ayaad ugu jilicday haddaadse tahay mid qallafsan oo qalbi adag way kaa kala tagi lahaayeen gaararkaada, ee iska cafi una dambi dhaaf warso kalana tasho amarka, markaas haddaad wax goosatana talo saaro Alle Ilaahayna wuxuu jecel yahay kuwa talasaartee**).

Naxariista iyo jilicsanaanta waxay sabab u yihiin midnimada iyo isu keeniidda quluubta, wuxuu yiri rasuulka:

(إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ ، وَلَنْ يُشَادَّ الدِّينَ أَحَدٌ إِلاَّ غَلَبَهُ، فَسَدِّدُوا وَقَارِبُوا وَأَبْشِرُوا ، وَاسْتَعِينُوا بِالْغَدْوَةِ وَالرَّوْحَةِ وَشَيْءٍ مِنَ الدُّلْجَةِ)

(**Diinka wuu fudud yahay, qof iskuma adkeeyo haddii kale wuu ka adkaanayaa, toosiya dhexdhexeysta bishaareysta, kaalmeysta arootii iyo galabtii iyo qeyb ka mid ah dheelmashada**), wuxuu yiri rasuulka:

(إِنَّمَا بُعِثْتُ بِالْحَنِيفِيَّةِ السَّمْحَةِ)

(**Waxaa layla soo diray diinta toosan oo sahlan**).

Sidoo kale wuxuu ugu yeeray in lagu faafiyo kagacal iyo nabad bulshada dhexdeeda iyagoo xataa kala duwan caqiida ahaan wuxuu leeyahay Alle:

{وَقُولُوا لِلنَّاسِ حُسْنًا}

(**Dadka wanaag ku dhaha**) wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{لَّا يَنْهَاكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ وَلَمْ يُخْرِجُوكُم مِّن دِيَارِكُمْ أَن تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ}

(**Alle idinkama reebayo kuwa diinta aan idinkula dagaallamin guryiinana aan idin kasoo saarin inaad u sameysaan samafal oona aad u garsoortaan, maxaayeelay Alle waa jecel yahay kuwa garsooreyaasha**).

Wuxuu ahaa nabiga mid kula dhaqmo dadka aan muslinka ahayn farriimaha quraanka, ixsaan ayuu u sameyn jiray hadiyadooda ayuu aqbali jiray, kooda bukan ayuu booqan jiray asoo muujinaya wanaagga diintan oona ilaalinaya midnimada bulshada iyo ishaysigeeda.

Waajibka waqtigan iyo fahanka kalamudnaanta waxay dusha ka saarayaan dhammaan muwaadiniinta daacadka ah oo fahansan marxaladan inay hal saf noqdaan ilaa dalkooda uu ka helayo wax ku filan xaga shaqadiisa, dhakhaatiirta waxay isku kaashanayaan sidey dalkooda ugu xaqiijin lahaayeen isku filnaansho sidoo kale raga qanuunka iyo handasada iyo beeraha iyo waxbarashada iyo dhammaan takhasusyada iyo farsamooyinka, taasna

waxay ku dhici kartaa in la kobcio wax huridda iyo wax bixinta, kan gacantiisa aayuu ku shaqaynayaa kanna hantidiisa ayuu wax ka bixinayaa kanna dadka ayuu wax barayaa, marka dhammaan awoodaha iyo mowhibooyinka ayaa dalka loo shaqo galinayaa, tanna waxay ka mid tahay diinteena, Alle wuxuu nagula hadlay dhammaanteena hab jameeco ah oo aan qof shaqada laga soo reebaynin, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{هُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ ذَلُولًا فَامْشُوا فِي مَنَاكِبِهَا وَكُلُوا مِن رِّزْقِهِ وَإِلَيْهِ النُّشُورُ }

(**Alle waa kan dhulka ka dhigay mid laylan ee ku socda waddooyinkiisa kana cuna quudkiisa kulankana haggiisa ayuu ahaan**).

Wuxuu leeyahay Alle:

{فَإِذَا قُضِيَتِ الصَّلَاةُ فَانتَشِرُوا فِي الْأَرْضِ وَابْتَغُوا مِن فَضْلِ اللَّهِ وَاذْكُرُوا اللَّهَ كَثِيرًا لَّعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ}

(**Markase salaadda la dhammeeyo dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Alle, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaan**)

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee, mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Walaalaha islaamka ahow:

Qofka si fiican ula socdo dhacdooyinka taariikhiga wuxuu ogaanayaa in kalatagga iyo khilaafka ay yihiin sabab ka mid ah sabaha jabka iyo daciifnimada, wuxuu nooga digay quraanka kariimka arrinkaas, wuxuu yiri Alle:

{وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ تَفَرَّقُوا وَاخْتَلَفُوا مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَهُمُ الْبَيِّنَاتُ وَأُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ}

(**Hana noqonina kuwa kala tegay oo kale ee iskhilaafay intay u yimaadeen xujooyin kadib kuwaasina waa kuwa cadaab weyn u sugan yahay**), wuxuu yiri Alle:

{وَلَا تَنَازَعُوا فَتَفْشَلُوا وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ وَاصْبِرُوا إِنَّ اللَّهَ مَعَ الصَّابِرِينَ}

(**Hana murmina ood fashilantaan uu tagana xooggiinnu samra Alle wuxuu la jiraa kuwa samree**).

Sidoo kale kalatagga iyo khilaafka waxay tagsiinayaa haybadda umadda waxay keenaan daciifnimo iyo

tabaryari waxaa ku filan digniin qofka ku dhinto inuu dhimasho jaahiliyo ku dhimanayo.

Sidaa awgeed Islaamka wuxuu la dagaallamay dhaqan kaste keeni kara kalatag iyo khilaaf, waxaad arkaysaa Islaamka asoo reebay midabtakoor oo ka mid ah raadyada qabyaaladda jaahiliyada oo la neceb yahay wuxuu yiri rasuulka:

(إِنَّ اللَّهَ (عَزَّ وَجَلَّ) قَدْ أَذْهَبَ عَنْكُمْ عُبِّيَّةَ الْجَاهِلِيَّةِ وَفَخْرَهَا بِالْآبَاءِ ، مُؤْمِنٌ تَقِيٌّ ، وَفَاجِرٌ شَقِيٌّ ، أَنْتُمْ بَنُو آدَمَ وَآدَمُ مِنْ تُرَابٍ)

(**Alle wuxuu idinka tagsiiyay kibirka jaahiliyada iyo ku faanidda aabbeyaashooda, waxaa jira mu'min taqi ah iyo faajir xun, waxaad tihiin ilmaha Aadam Aadamna waxaa laga abuuray caro**).

Sidoo kale wuxuu caddeeyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - inay dadka ku siman yihiin xuquuqda iyo waajibaadka, wuxuu yiri rasuulka:

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ ، أَلَا إِنَّ رَبَّكُمْ وَاحِدٌ ، وَإِنَّ أَبَاكُمْ وَاحِدٌ ، أَلَا لَا فَضْلَ لِعَرَبِيٍّ عَلَى عَجَمِيّ ، وَلَا لِعَجَمِيٍّ عَلَى عَرَبِيٍّ ، وَلَا أَحْمَرَ عَلَى أَسْوَدَ ، وَلَا أَسْوَدَ عَلَى أَحْمَرَ ، إِلَّا بِالتَّقْوَى...) .

(**Dadow: rabbigiina waa hal, aabbihiinana waa hal, qof carab ah kama fadli badna qof cajam ah, qof cajam ahna kama fadli badna qof carab ah, qof guduudanna kama fadli badna qof madow, qof madowna kama fadli badna qof guduudan Alle ka**

cabsi mooyee, kiina ugu qiimaha badan xagga Alle waa kiina ugu taqwo badan…)

Ilaahayow mid ka dhig safkeena, quluubteenana isu keen, wixii aad jeceshahay ood raalli ka tahayna na waafaji, ikhlaaska hadalka iyo camalka nagu arsaaq, masarteenana noo ilaali, calankeedana dunida ka taag